

Cilmi baaris ayaa muujinaysa in haysashada Afkaaga hooyo aysan keliya faa'iido u yeelan doonin bulsho ahaanta iyo dareenka ilmahaaga, laakiin oo ay sidoo kale hormarsiin doonto xirfadahooda garaadka, waxayna sare u qaadaysaa shaqaynta maskaxda, waxayna ka caawinaysaa barashada luuqadaha cusub.

## Waxaa jira sababo badan oo canugaaga loola hadlo Afkaada hooyo.

- Qoyskaaga ayaa si sahlan u wada hali doonaa oo waxayna awoodi karaan inay isusheegaan sheekooyin adag oo waxayna wadaagi karaan kaftan iyo heeso.
- Adiga iyo ilmahaagu waxaad dareemi doontaan inaad isku soo dhowaateen.
- Ilmahaagu wuu maqli doonaa oo baran doonaa inuu isticmaalo luqad qaymo badan iyo isku sharxi kara.
- Ilmahaaga ayaa waxay u badan tahay inuu adiga dareen kula wadaago.
- Adiga iyo cunugaagu ayaad si fiican iskufahmi kara.
- Ilmahaagu ayaa ugu badan tahay inuu ku dhagaysan doono.
- Ilmahaagu wuxuu dareemayaa inuu ka tirsan yahay kuna faani karaan luqaddooda iyo dhaqankooda.
- Ilmahaagu wuxuu la hadli karaa xubnaha kale ee qoyska iyo saaxiibada qoyska.
- Ilmahaagu ayaa waxay u badan tahay inuu ku hadlo labada luuqadood oo si aad u xoogan. Tani waxay horseedi kartaa guulo badan oo iskuulka ah.

Markii qof cusub ilmahiisa ay bilaabaan inay ka qeyb gallaan barnaamijka xanaanada cunugga ama iskuul aadida, waxaa laga yaabaa in aysan fahmin ama aysan ku hadlin Ingiriis, laakiin taasi waa arrin caadi ah! Mudo bilooyiin gudahiis, caruurta badigooda waxay bartaan Ingiriis. Sida canugaada u sii weynaanayo, waxay u badan tahay inay bilaabaan inay ku hadlaan Ingiriis badan oo in badan ah.



## Talooyin ku Saabsan Haysashada Afkaaga Hooyo:

- Had iyo jeer kula hadal afkaada hooyo kuna dhiirigeli dhamaan xubnaha qoyska inay isticmaalaan.
- Haddii ilmahaagu uu ku hadlayo Ingiriis, weydii inay kugu sheegaan waxa ay ku yiraahdeen afkaaga hooyo. (Marka koowad waxaad ku tiraahdaa afkaaga hooyo, si ay u bartaan sida.)
- Isticmaal ciyaaraha, heesaha iyo sheekooyinka si aad uga dhigto mid xiiso luqadeed leh.
- Wada sheekaysiga dhabta ah la yeelo, halkii aad ilmahaaga u sheegi lahayd waxa la sameeyo.
- Haddii aad ilmahaagu ka horjoogsanayo inay ku hadlaan afkooda hooyo, waad u meelayn kartaa guriga ama waqti gooni ah (tusaale ahaan, casho) inaad ku hadashaan luqadaada hooyo kaliya.

Booqo [cmascanada.ca/cnc/parents](https://cmascanada.ca/cnc/parents) wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada